



Federal Republic of Somalia
Federal Parliament
The Upper House

Nuqulka Rasmiga Ah ee Hadal Qoraalka Gaaban ee Golaha Aqalka Sare ee BFS
Si waafaqsan Qod.39aad ee Xeer hoosaadka Golaha Aqalka Sare

Baarlamaanka 11 ^{aad}	
Kalfadhiga: 7aad	Kulanka: 8aad
Taariikhda: 19 Nov, 2025	Goobta Fadhiga: Xarunta Aqalka Sare
Saacadda uu Furmay: 11:23 AM	Saacadda uu Xirmay: 12: 26 PM
Shir Guddoonka Fadhiga: Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare. Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi	Guntanka Kulanka: 31 Senator
Martida Kulanka: 1. Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka XFS Marwo Khadiija Maxamed Al Makhsuumi. 2. Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Arrimaha Gudaha, Federaalka iyo Dib-u-heshiisiinta XFS Mudane Abdikarin Hassan Ashkir.	Ajendayaasha Kulanka: 1. Akhrinta Aayadaha Qur'aanka. 2. Ansixinta Ajendaha. 3. Soo gudbinta iyo Ansaxinta Guddiga Xuquul Insaanka. 4. Akhrinta 2 ^{aad} ee Hindise-sharciyeedka Dad Dhigista iyo Xaaladaha Madaniga ah.

Furitaanka Kulanka:

Senator Senator Sareda Maxamed Xasan Jeyte ayaa akhrisay Aayadaha Quraanka ee Kulanka lagu furay.

Ansixinta Ajendayaasha Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa xubnaha kulanka fadhiyey ka codsaday in ay ansixiyaan Ajandayaasha kulanka, codaynta ayaana u dhacday sidaan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: 1 Senator

Diidmo: Majirin

Nuxurka Kulanka:

Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Wasiirka Wasaaradda Qoyska iyo Horumarinta Xuquuqul Insaanka, Marwo Khadiija Maxamed Al Makhsuumi, si ay Golaha uga hor jeediso warbixin ku saabsan hannaanka xulista xubnaha cusub ee Guddiga Xuquul Insaanka. Warbixinta Kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka ayaa cod geliyey Ansixinta xubnaha Guddiga Xuquul Insaanka, waxayna u dhacday sidan:

Oggol: 28 Senator

Ka aamusay: 1 Senator

Diidmo: Majirin

Ansixinta kaddib, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare ayaa u yeeray Guddoomiyaha Guddiga Arimaha Gudaha, Dib-u-heshiisiinta, Arimaha Federaalka iyo Xiriirka DXDFS Senator Deeqa Xasan Xuseen si ay Golaha uga hor akhriso warbixinta Akhrinta 2aad ee Hindise-sharciyeedka Dad Dhigista iyo Xaaladaha Madaniga ah, Warbixinta kaddib, 2 senator ayaa dood ka yeeshay Hindise-sharciyeedka.

Go'aamada kulanka:

1. Ansixinta Ajandayaasha kulanka.
2. Ansixinta xubnaha Guddiga Xuquul Insaanka.
3. Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullahi ayaa faray Guddiga Arrimaha Gudaha, Dib u heshiisiinta, Arrimaha Federaalka iyo Xiriirka DXDFS in ay soo diyaariyaan qodobada laga dooday, iyaga oo la kaashanaya sharciyaqaanada Golaha Aqalka Sare, si loo marsiiyo akhrinta saddexaad.

Ugu dambayntii, Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare Senator Cabdi Xaashi Cabdullaahi ayaa kulanka soo xiray saacadu markay ahayd **12:26PM**.

DHAMAAD